



Diyaarinta Sharciga Dabka Shidaalka ee Seattle.

Shidaalka dabka lagu shito ayaa ah kan ugu qaalisan ahna nooca ugu badan ee hawada wasaqeeya ee lagu isticmaalo dabka gudaha Seattle. Si gacan looga gaysto hagaajinta tayada hawada, looga hortago taangiyada shidaalka ee dilaaca, loona yarayn lahaa wasaqeeynta hawada, Seattle ayaa meel marisay sharci si gacan looga gaysto sidii meesha looga saari lahaa dabka shidaalka marka lagaaro sanadka 2028.

Faahfaainta:

- **Laga bilaabo Sebteembar 1, 2021, shidaalka dabka ee lagu iibiyo Seattle waxaa la saarayaa canshuur qiyaastii dhan 24 senti halkii gallon ba.** Canshuurta waxaa la saarayaa shirkadaha iibiya shidaalka dabka. Haddii shirkada adeegga shidaalku canshuurtaan dulsaarto macaamiisha deegaanka, qarashka ayay u badan tahay inuu kor ukaco celcelis dhan \$118 sanadkiiba. Qarashkaan waxaa lagu saleeyay celceliska ah in qoyskiiba isticmaalo 500 oo gaaloon oo shidaal ah sanadkiiba.
- Qarashka kasoo xarooda canshuurta shidaalka waxaa loo adeegsan doonaa inuu gacan kagaysto bixinta qarashka ka guurida shidaalka looguna guuraayo dab dhaliyaha tamarta tashiilan ee korontada ka shaqeeya oo lasiinaayo qoysaska danyarta ah. Qoysaska danyarta ah ayaa lasiinaaya lacag kaabid ah si looga caawiyo dhimista qarashka u wareegida dabka korontada ah.

Ilaha lagu caawinaayo dadka reer Seattle ee danyarta ah si ay u maareeyaan qarashaadka dabka iyo siday uga guuri lahaayeen dabka shidaalka oo ay ugu guuri lahaayeen koronto nadiif ah, oo tashiilan:

- **Qarash celinta Canshuurta Shidaalka**
Magaalada Seattle waxay qarash celin u samaynaysaa qoysaska dakhli ahaan u qalma ee ka qaybgala Utility Discount Program (Barnaamijka Qiimo Dhimista Alaabta guriga), oo loo celinaayo **lacag dhan \$120/sanadkiiba**. Qarash celinta ayaa la samayn doonaa sanad kasta waxaana lagu shubayaa midkood koontada macmiilku kuleeyahay Seattle City Light si toos ah, ama jeeg ahaan ayaa loo siinayaa.
- **Dab dhaliyaasha Bilaa Qarashka ah**
Qarashka kasoo xarooda canshuurta shidaalka ayaa gacan ka gaysan doona bixinta qarashaadka kasoo wareegida dabka shidaalka laga dhaliyo loona wareegaayo dab dhaliyaasha korontada ku shaqeeya oo la siinaayo kudhawaad 1,000 qoys oo dakhli ahaan xaq uleh. Tan waxaa kujira shaqo kasaarida taangiga shidaalka iyo ka bixinta foornooyinka shidaalka ee duqoobay.
- **Dab Dhaliyaasha dadka Kiraystayaasha ah**
Haddii kirayste buuxiyo shuruuda dakhliga, Magaalada ayaa kala shaqayn doonta mulkiilaha dhulka fasax si ogolaanshaha mulkiilaha si loo sameeyo cusboonaysiin taas badalkeedna, mulkiilaha dhulka ayaa aqbalaaya heshiis kiro oo looga hortago inuusan kirada kordhin muddo 3 sano ah.
- **Utility Discount Program**
Barnaamijkaan waxaa heli kara qoys kasta oo dakhli ahaan xaq uleh - mana ahan mid ufuran kaliya dadka dabka shidaalka isticmaala. Inaad kasoo wareegto adeegsiga shidaalka oo aad u wareegsato dabka korontada waxay

kadhigan tahay in qarashaadka dabka korontada qiima dhimis lagu samayn doono ilaa 60%. Dadka barnaamijka ka qaybgalaaya ayaa sidoo kale helaaya qiimo dhimis dhan 50% oo loogu samaynaayo qarashaadka biyaha iyo bulaacada. Wixii faahfahain ah, wac 206 684 3417 ama booqo barta <https://www.seattle.gov/light/assistance/>

Maxaa uqalma in qoysku noqdo mid danyar ah?

Shuruudaha uqalmida dakhliga cusboonaysiinta dab dhaliyaha ayaa ka doonaaya qoysaska inay helaan 80% Celceliska Udagsan Dakhliga ee aaga ay dagan yihiin ama cadad kasii yar.

Tirada Qoyska	Dakhliga Sanadkii
1	\$60,800
2	\$69,500
3	\$78,150
4	\$86,900
5	\$95,850

Ilaha adeegyada DHAMMAAN dadka reer Seattle ee isticmaala dabka shidaalka:

- **Caymiska lagu yaraynaayo qarashaadka nadiifinta taangiga shidaalka ee dilaaca - BILAASH**
Gobalka Washington ayaa bixinaaya barnamijka caymiska dilaaca taangiga oo bilaash ah kaasoo bixinaaya lacag dhan ilaa \$60,000 oo qarashaadka nadiifinta ah lana siinaayo dadka mar hore iska diiwaangashay barnamijka. Gobalka waxa uu mar horeba bilaabay inuu abuuro barnamij deeq iyo mid deyn oo uu siinaayo dadka aan horey oga diiwaangashanayn caymiska oo deegaanka degan. Faahfaahin dheeraad ah ayaad ka helaysaa barta www.plia.wa.gov.
- **Lacagaha kaabista ah**
Qoysasku waxay heli karaan lacag kaabis dhan \$1,500 markay ka guurayaan shidaalka oo ay u gurayaan nidaamka dab dhaliyaha korontada. Kadib markaad ka guurto shidaalka ee aad u guurto korontada, waxaad sidoo kale xaq uyeelan kartaa lacagaha kaabista ah ee bilaashka ah iyo daaqada ee Seattle City Light.
- **Helitaanka dookhyada**
Qoysasku waxay heli karaan daymo dulsaarkoodu yartahay si ay ubaxshaan qarashaadka cusboonaysiinada tamarta waxtarka ah, ayna kujiraan kuwa dab dhaliyaasha korontada ku shaqeeya, sifaynta, iyo arimo kale oo badna. Waxaa sidoo kale jiro fursad aad daynta kubixin karto biilkaaha shirkada Seattle City Light. Craft3 (www.craft3.org/) iyo Puget Sound Cooperative Credit Union (www.pscu.org/) ayaa ah dayn bixiyaasha bixinaaya barnamijyadaan.

Wixii faahfahin dheeraad, la xariir HeatingOil@seattle.gov